

Baaritaanka meydka ilmahaaga

Aad baanu uga xunahay geerida kusoo gashay.

Waxaa lagu siiyay xaashidan macluumaadka sababtoo ah waxaad ogolaatay in baaritaan lagu sameeyo meydka ilmahaaga. Baaritaankaani wuxuu naga caawin doonaa inaan ogaano sababta dhallaankaagu u dhintay.

Kooxdaada daryeelka caafimaadka ayaa kaala hadashay fursadahaaga ku aadan baaritaanno dheeraad ah.

Waxa kale oo ay ahayd in lagu siiyo macluumaad kale oo qoran, oo ay ku jiraan Go'aaminta haddii ilmahaaga meydkooda la baarayo.

Haddii kale, waxaad codsan kartaa nuqul. Ama waxaad iskaan gareen kartaa QR koodhka ku yaal xaashidan macluumaadka ah dhamaadkeeda si aad u akhriso. Xaashidan macluumaadka waxa ay sharxaysaa waxa xigi doona, halka uu baaritaanku ka dhacayo iyo cidda lala xiriirayo si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

Maxaa dhacaya markaad ogolaato in meydka la baaro ka dib?

Markii aad wakhti la qaadato dhallaankaaga ka dib, kooxdaada daryeelka caafimaadku waxay u sheegi doonaan isku-duwaha Adeegga Baaritaanka Meydka Dhallaanka ee Victoria (Victorian Perinatal Autopsy Service - VPAS) inuu ogaado ilmahaagu inuu diyaar u yahay baaritaanka meydka lagu sameeyo. Iskuduuhaha VPAS ayaa qabanqaabin doona in ilmahaaga loo wareejiyo goobta takhasuska leh si loogu baadho.

Waxaad la xiriiri kartaa iskuduuhaha VPAS laga bilaabo wakhtiga ilmahaagu ka tago daryeelkaaga. Waxay u joogaan inay ka jawaabaan su'aalahaaga oo ay kugu wargeliyaan macluumaad kastood rabto. Waxaad faahfaahintooda ka heli doontaa dhammaadka xaashidan macluumaadka.

Xagee lagu sameyn doonaa baaritaanka meydka?

Baaritaanka meydka dhallanka wuxuu ka dhici doonaa:

- Isbitaalka Royal Women's Hospital, Parkville (Royal Children's Hospital Pathology)
- Caafimaadka Monash, Clayton (Monash Pathology)
- Isbitaalka Mercy ee Haweenka, Heidelberg (Austin Pathology)

Intee in le'eg ayay qaadataa baaritaanka meydka?

Baaritaanka dhimashada ka dib wuxuu ku bilaabmaa baaritaanno dibbada jirka ah sida raajo ama MRI. Baaritaanadan waxa loo samayn doonaa sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogalka ah laakiin waxa ay qaadan kartaa dhawr maalmood, waxayna ku xiran tahay marka adeegyadaas la heli karo. Baaritaanadan marka la dhameeyo ka dib, baaritaanka jirka gudhiisa ah, oo ku lug leh qalliin, ayaa dhici kara. Baaritaanka guduuhu wuxuu qaadan doonaa ku dhawaad saddex saacadood.

Waxaan fahamsanahay inay muhiim kuu tahay inaad ogaato inta ilmahaagu ku jiri doono daryeelkayaga, sababtoo ah tani waxay saameyn kartaa qorshahaaga aaska ilmahaaga.

Marka ilmahaaga la geeyo goobta takhasuslahaa, iskuduuhaha VPAS ayaa ku siin kara fikrad sax ah oo ku saabsan goorta ilmahaaga laguu soo celin doono.

Maxaa dhacaya baaritaanka meydkaa ka dib?

Marka aan dhammeyno baarista meydkaa, waxaan la shaqeyn doonaa maamulahaaga aaska si aan si nabdoon oo xushmad leh uga wareejino dhallaankaaga daryeekayaga uguna wareejinno kooda.

Ma arki kartaa ilmahaaga baaritaanka meydkaa ka dib?

Haa. Waalidiinta qaarkood waxay doortaan inay waqtii la qaataan ilmahooda baarista meydkaa ka dib, ama inta ilmahoodu ku jiro daryeelka agaasimaha aaska ama, xaaladaha qaarkood, waxay waqtii kula qaataan guriga.

Tani waa go'aan shakhsii ahaaneed oo qoyskaaga ay tahay inay gaaraan.

Haddii ilmahaaga lagu sameeyo baadhis buuxda ama xaddidan ee dhimashada ka dib ah, takhtarka cudurada dhalmada (dhakhtarka) ayaa samayn doona meelo qallii (la jeexay) si uu u baaro unugyadooda iyo xubnahooda. Baaritaanka ka dib, waxay si taxadar leh u toloyaan meelaha la jeexay. Marka maro lagu daboolo dhallankaaga, meesha la jeexay ma muuqan doonto.

Goorma ayaad heli doontaa natijjada baaritaanka meydkaa?

Baaritaanka dhimashada ka dib, takhtarka cudurada dhalmada ayaa qori doona warbixin tafatiran oo sharaxaysa waxa ay heleen.

Warbixinta ayaa inta badan lagu dhammeeyaa 10 ilaa 12 todobaad gudahood, waxayna ku xiran tahay baaritaanada loo baahan yahay, iyo inta ay qaadanayso in natijjada la helo. Warbixinta waxaa loo diri doonaa dhakhtarka daryeelay adiga iyo ilmahaaga.

Waxay kuu qabanqaabin doonaan ballan dabagal ah si ay kaagala hadlaan wixii la helay intii lagu jiray baaritaanka meydkaa ilmahaaga.

Taageero baroordiiq iyo maclumaadka

Haddii aad u baahan tahay maclumaad dheeraad ah iyo taageero, fadlan la hadal kooxdaada daryeelka caafimaadka.

Waxaad iskaan gareen kartaa qr koodh yaashaan si aad u hesho maclumaad ku saabsan:

Baroordiiqda

maclumaadka



VPAS Qoyska

ilaha



La xidhiidh iskuduuhaha VPAS haddii aad u baahan tahay faahfaahin dheeraad ah

T [1800 841 024](tel:1800841024)

E VPAC@thewomens.org.au

Saacadaha

Isniin ilaa Jimce

9:00-ka subaxnimo ilaa 5:00-ta galabnimo.